



## Talooyin Kooban

### Creating a Rich Play Environment

Mid ka mid ah kaalinta macalinku waa diyaarinta jawi fiican oo ilmuuhu ku ciyaraan, waxna ku bartaan. Waxyaabaha soo socdaa waa xeelado sahlaya sidii loo dhisi lahaa jawi u qalabtiran ciyarta:

**Hubso in carruurtu helaan waqtii ku filan maalin kasta oo ay ku ciyaraan.**

Ciyaarta u samee waqtii go'an oo joogto ah oo ilmuuhu xor u yihiin siday doonaan inay u ciyaraan. Carruurtu guud ahaan waxay u baahan yihiin:

- 30–60 daqiqo oo ku bilaabaan kuna dhamaystiraan hindiso ciyaareed.
- Waqtii badan oo suurto galin kara ciyaar maloawaalo iyo dad la dhaqan leh.

**Sii carruurta noocyoo qalabka ciyarta oo kobciya doorka ciyarta jilitaanka iyo mala'awaalka.**

- Ku dar alaaboooin matalaad wacan siin oo mawduucyo khaasa ku socda una muuqda sidda kuwa si dhab ah loo isticmaalo sida buugga makhaayadaha cunaddooda looga dalbado—iyo qalabka jikadda loo isticmaali ama mawduucto u dhigma sida kale (taleefannada, furayaasha, iwm.).
- Haduu qof xirfadle ah idin soo booqdo ama daawasho ku tagtaan meelo muhiim ah, ka soo qaado ama iskaa uriri waxyaabo la taxaluqa shaqooyinkaas si carruurtu qaab matalaad ah hadhow ugu ciyaraan. Tusaale ahaan, Qof Booqasho qof ubaxa iibiyaa dabadeen isu keen waxyaabo matali qofkaa shaqadiisa sida shay dhoobada ubaxa lagu beero, ciid, qaadadda shamiitada lagu balaadhiyo, ubaxyo mala'awaal ah, iwm si caruurtu u hesho fursado ciyaareed

oo xoojiya waxbarashadooda iyo qaabka ciyaartooda.

**Ku dar qalabka matalaada iyo majaagiladda oo xiiso geliya in matalaadu ka mid noqoto ciyaar goob walba loo isticmaalo.**

- Goobaha ciyarta dhismaha iyo faramaayaha ha la dhigo koofiyadaha adag iyo suumanka qalabka dhismaha lagu qaato.
- Miiska sawir-gacmeedka lagu sameeyo iyana dhig rinjiyo kala nooca iyo karanbiyoolaha rinjiga laga xirto.
- Meesha ciyarta sayniska dhig kaamirooyin, shabagyada balanbaalista, iyo koofiyadaha safaariga, iwm.

**Meelaha ilmuuhu ku ciyaraan ku soo bandhig sawiro iyo buugaag ku saabsan bay'ado kala duwan oo haya hawlo kala duwan si ay u arkaan doorka kala duwan oo ciyaartoodu matali karto.**

- Ku dar tusaalayaal dad kala duwan oo dumar iyo ragba leh kuwaasoo qabanaya shaqooyin kala duwan sida haweeney geesiyyad matalaysa, nin kalkaaliye caafimaad ah, gabar boolis ah, iwm.
- Tus tusaalooyin degaano iyo nolol dhaqammo kala duwan qaabkooda muujin sida qol ku dhex yaal kaynta, teendho meal cidla ka dhisan, qoys reer guuraa ah oo ku nool aqal marna la dhiso marka la guurana la furfuro.

**"Carruurtu waxay u baahan yihiin xorriyad iyo waqtii ay ku ciyaraan. Ciyaar raaxo kaliya ma ah. Ciyaar waa lama huraan."**

~ Kay Redfield Jamison

- Tus sawiro iyo sheekoojin muujinaya xirfado kala duwan sida isboorti la cyaaro, gaadiid kala duwan, iwm oo dhalinkara figrad-noocyoo ciyaareed.

Ku dhiiri geli carruurta ciyaartoodu inay ku ekaan ta gooba ciyaarta kaliya ee noqoto mid matilaad qoto dheer leh.

U abuur carruurta fursado ay meelo kala duwan kaga qayb galaan ciyaar-riwaayaadka.

- Carruurta ku ciyaarta dhoobada cajiman waxay gaari karaan inay marka dambe wax ku dubaan foornadda.
- Caruuurta ku ciyaara miiska biyaha la saaro waxay u dhaqi karaan suxuunta makhaayada, iwm.
- Ku badal xarunta akhris iyo qorista sidiin meel school ah, ama dugsi, boostadda ama maktabad.
- Aagga ciyaarta labbiska wuxuu noqon karaa dukaan dharka iyo kabaha lagu iibyo, iwm.

U adeegso ciyaarta mataalaada meelo kala duwan sida sheeko-wadaaggaa iyo waqtiyada casharada u dhexaysa.

- Carruurtu markay dibadda u baxayaan ha iska yeel-yeelaan sidiin inay yihiin xayawaan.
- Sii carruurta fursado ay u jilaan ama dib ugu sheegaan sheekoojin horey loogu akhriyay.

### Xog dheeraad ah

National Association for the Education of Young Children

<http://www.naeyc.org>

Qwada Ciyaarta

<http://www.childrensmuseums.org/images/MCMReSearchSummary.pdf>

Zero to Three

<https://www.zerotothree.org>

Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo  
[www.inclusivechildcare.org](http://www.inclusivechildcare.org).

Copyright © 2021 Center for Inclusive Child Care

Qalabkan waxaa si tartiib tartiib ah loogu soo saari karaa ujeeddooyin waxbarasho. Macluumaadka ku yaal xaashidan tilmaamaha ah waxaa laga beddelay ilo badan.

Dhaqaale ay bixiso Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota.

[www.inclusivechildcare.org](http://www.inclusivechildcare.org)